www.somalilandlaw.com

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADA

# Xeerka Wareejinta Maxaabiista

## XEER NO - 53/2012

www.somalilandlaw.com

# Golaha Wakiiladdu:

**Markuu Arkay;** Qodobka, 10aaad, 26aad, 27aad, 28aad, 34aad f/2aad, 35aad f/3aad Iyo 39aad ee Dastuurka JSL

**Markuu Arkay:** Soo gudbintii Madaxweynaha ee sumadeedu ahayd JSL/M/SHGW/081/2 936/022012 kuna taariikheysan 16/02/2012 kuna saabsanayd soo gudbinta Xeerka Wareejinta Maxaabiista.

**Markuu Ku Qancay:** Baahida loo qabo Xeerka Wareejinta Maxaabiista.

**Wuxuu Saaray:**

**Xeerka Wareejinta Maxaabiista Xeer Lr. 53/2012.**

# QEYBTA 1aad

### Eray Bixin

### Qodobka 1aad (Eray bixin)

Xeerkani erayadan soo socda waxa loola jeedaa:

**"Hay'adda Awooda u leh"** marka loo eego Somaliland waxa loola jeedaa Wasiirka Cadaaladda ama qof wasiirku u magacaabay si waafaqsan Xeerkan; Sidoo kale marka loo eego dawlad kale waxa loola jeedaa hayadda masuulka ka ah maareynta iyo wareejinta maxaabiista dawladaas kale.

**"Taliye"** waxa loola jeedaa Taliyaha Ciidanka Asluubta.

**"Wadanka la tilmaamay"** waxa loola jeedaa; wadan kasta oo la tilmaamay sida ku cad Qodobka 3aad ee Xeerkan.

**"Wasiir"** waxa loola jeedaa Wasiirka Cadaaladda.

**"Maxaabuus"** waxa loola jeedaa; qof lagu hayo xabsi oo xukun lagu riday ama maxbuus xukuman oo cusbitaal xadhigiisa ku qaadanaya ama maxbuus xukunka xabsigiisa ku qaadanaya dibad jog (parole).

**"Wareejin"** Waxa loola jeedaa; ka soo warejin maxbuus wadan tilmaaman oo la keenayo Somaliland ama ka wareejin maxbuus Somaliland oo loo wareejinayo wadan tilmaaman;

# QAYBTA: 2aad

## KU WAREEJIN MAXAABIIS SOMALILAND

### Qodobka 2aad (Ujeedada Xeerkan)

Xeerkan Wareejinta Maxbuuska waa xeer ka dhaxaynaya Dalka Somaliland iyo waddan kale, iyada oo ujeedadu tahay in maxbuus xukuman laga wareejiyo dalkii xukumay oo loo wareejiyo dal kale si uu xadhigiisa ugu qaato.

### Qodobka 3aad

### (Waddan Tilmaaman)

Marka heshiis maxaabiis isku wareejiin ay Somaliland la gasho dal kale oo tilmaaman, Wasiirka Cadaalada waxa uu go'aankaas ku soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee qaranka isaga oo mujinaya in Qodobada Xeerkan lagu dabaqayo wadankaas; iyaguna si la mid ah marka loo eego shuruudaha, tilmaamaha iyo waxyaabaha gaarka ah ee la iskula qaatey heshiiska.

## Qodobka 4aad

## (Codsiga Wareejinta)

1. Wasiirka markuu codsi ka helo hay'ada awooda u leh ee dalkaas tilmaaman oo tilmaamaysa:
   (b) In Maxbuus ama wakiilkiisu dalbaday in loo wareejiyo Somaliland oo dalkaasina uu aqbaly wareejinta; ama
   (c) Wadankaas soo dalbaday soo wareejinta maxbuuska iyadooy jirto heshiis caalami ah, maxbuuska xukuman loogama baahna markan aqbalaadiisa.
2. Wasiirku isagoo la tashanayaa Xeer- ilaaliyaha Guud, wuxuuna markaas go'aaminayaa in la aqbalo ama la diido wareejintaas.
3. Marka la soo dalbanayo soo wareejinta maxbuus xukuman si waafaqsan qodonkan waa in ay la socdaan qoraalada iyo cadaymaha looga baahanyahay wadanka tilmaaman ama hayadayadihii kale ee loo baahanyahay si waafaqsan heshiiska caalamiga ah oo ay ku jiraan nuqul sugan ee xukunka maxbuus ama amarada kale ee maxkamadeed.

## Qodobka 5aad

## (Shuruudaha Codsiga Maxbuuska)

1. Codsiga wareejinta maxaabus si waafaqsan Xeerkan waxa uu wasiirku dalban karaa in la helo tilmaamahan hoos ku qoran:-
   a) Magaca, Jinsi (dheddig ama lab), taariikhda iyo meesh uu ku dhashay. Haddii aanay taariikhda dhalashadu sugnayn waxaa la qiyaasayaa da'da maxbuuska.
   b) Ciwaanka maxbuuska ee Somaliland haddiiba uu jiro.
   c) Warbixinta caafimaad ama macluumaadka kale ee ku saabsan maxbuuska oo ay ku jiraan warbixinta daaweyntiisa uu ku qaatay dalkaas iyo wixii talo bixin ah ee la xidhiidha daaweyntiisa dambe ee Somaliland.
   d) Ciwaankii ugu dambeeyey ee meesha uu daganaa maxbuusku.
   e) Saddex qof magacyadooda iyo ciwaanadood oo lagala xidhiidhi karo marka uu maxbuusku yahay mid aan Somaliland u dhalan oo aan si rasmi ah u dagnayn Somaliland.
   f) Iyo Warbixinadda kale oo wasiirku u arko inay lagama maarmaan u yihiin wareejinta maxbuuska.

www.somalilandlaw.com

## Qodobka 6aad

## (Macluumaad dheeraad ah)

1. Wasiirku isagoo tixraacaya codsiga ku tilmaaman Qodobka 4aad ee Xeerkan, wuxuu waddanka la tilmaamay ka codsan karaa in macluumaad dheeraad ah u soo gudbiyaan oo la xidhiidha:

   (a) Sababta uu Maxbuusku ku codsaday in loo wareejiyo Somaliland ama raaliga ugu yahay wareejinta.

   (b) In maxbuuska, marka loo eego jidh ahaan iyo maskax ahaan ama da' ahaan aanu awoodin inuu rabitaankiisa wax ku dalbado, hasayeeshee qof kale dalbaday isagoo ka wakiil ah maxbuuska.

   (c) Marka dalabkan la soo sameeyo waxa loo raacayaa si waafaqsan Qodobada 3, 4,5,6,7,8,10,11

## Qodobka 7aad

## (Wareejinta Reeban)

Wasiirka waxaa ka reeban inuu ogolaado wareejin maxbuuska si waafaqsan Xeerkan haddii maxbuuska wax ka yar lix bilood ay uga hadhsan tahay xukunka xadhigiisa marka laga reebo duruufo gaar ah oo jira awgood.

## Qodobka 8aad

## (Go'aanka Wasiirka)

1. marka uu Wasiirku go'aaminayo dalabka wareejinta maxbuuska wuxuu markaas:

   (a) ogaysiinayaa go'aanka diidmada hay'adda qaabilsan ee dalkaas tilmaaman;

   (b) Ogeysiinayaa go'aanka oggolaanshaha wareejinta hay'adda qaabilsan dalkaas tilmaaman wuxuuna ku soo saarayaa amar lagu tilmaamayo ujeedadaas.

2. Maxbuuska ama Maxbuuska Wakiilkiis ee ah dadka ka cabanaaya go'aanka Wasiirka waxaa u bannaan inay ka dalbaan dib-u-eegis go'aankaas maxkamadda awooda u leh.

## Qodobka 9aad

## (Amarka soo Wareejinta Maxbuuska)

1. Marka Wasiirku ogolaado wareejinta Maxbuuska, wuxuu markaas soo saarayaa amar ogolaanaya:

(a) In Maxbuuska laga soo wareejiyo dalkaas tilmaaman oo la keeno Somaliland;

(b) In soo raridda maxbuuskaas uu qaabilsan yahay Sarkaal loo xilsaaray oo geyn doona meel xabsi ah oo lagu tilmaamay amarkaas gudihiisa.

(c) Xabsiga maxbuuska si waafaqsan tilmaamahan lagu sheegay amarka, waxa ku jiri doona tilmaamo sugan oo ku haboon habka soo wareejinta iyo qorshaha qabanqaabada wareejinta maxbuuska.

## Qodobka 10aad

## (Xaalado Gaar ah)

1. Muwaadin reer Somaliland ah oo dembi lagu eedayey isagoo jooga waddan tilmaaman, iyadoo:-

   (a) Maxkamad waddankaasi ahi ay amartay in lagu hayo xabsi sababtoo ah waxaa la ogaadey in uu yahay qof waalan ama xiskiisu dhiman yahay ama aan degenayn maskax ahaan oo aan maxkamad la soo taagi karin.

   (b) Lagu helay inuu dembi geystay qofkaas, laakiin waqtiga uu fal-dambiyeedka geystay uu ahaa qof xiskiisu dhinaa maxkamadduna amartay in la hayo.

2. Haddaba qofkaas kor ku tilmaaman waxaa lagu soo wareejin karaa Somaliland marka ay soo codsato hay'adda awooda u leh ee dalkaas iyadoo ay la jirto oggolaanshaha xeer-ilaaliyaha guud.

## Qodobka 11aad

## (Qoritaanka Qoraalada)

1. Codsi kasta oo la xidhiidha soo wareejin maxbuus iyo jawaabta laga bixinayaa waa inay ahaadaan qoraal.

2. Dhamaan arrimaha la xidhiidha wareejinta maxbuuska waa inay ahaadaan kuwo qeexan.

## Qodobka 12aad

## (Aqoonsiga Qoraalada)

1. Nuqulka xukunka ama amaradda ku tilmaaman Qodobka 4aad waa in:-

   a) Loo aqoonsado cadaymo sugan arrimaha lagu tilmaamay.

   b) Loo tixgaliyaa sidii xukun ama amar ka soo baxay maxkamadda awooda u leh ee Somaliland.

c) Dhamaan qoraaladda loo baahan yahay ee lagu tilmaamay Xeerkan waxaa loo aqoonsayaa kuwa sugan haddii qoraaladaas ay soo sugeen ama saxeexeeen garsoore ama qof kale oo masuul ka ah hay'addaha ciqaabta ee dalkaas ee uu ku xidhnaa maxbuusku, waxana loo qaadanayaa cadaymo xaqiijinaya arrimaha ay tilmaamayaan haddii aan si ka duwan loo caddayn.

2. Qoraaladda lagu tilmaamay qaybtan marka la aqbalo:

a) Waxa loogu dhaqmayaa sida kuwa ay sugaan ama ay saxeexaan si la mid ah qof lagu xukumay Somaliland.

b) Si waafaqsan Xeerkan waxa raadkooda sharci loo tixgelinayaa waxyaabaha ay xanbaarsanyihiin.

## Qodobka 13aad

## (Xabsi ka Dhimista Maxbuuska'Remission')

1. Maxbuuska la soo wareejiyey ee ku xukuman xabsi:

a) Waxa uu xaq u lahaanayaa in loo xisaabiyo mudadii xukunka xadhigiisa uu ku soo qaatay wadankii xukumay ka hor intii aan la soo wareejin.

b) Waxa uu xaq u lahaanayaa xabsi ka dhimis mudadada uu xidhan yahay haddii uu mutaysto laga bilaabo maalinta la soo wareejiyo si waafaqsan xeerka dalkaas la tilmaamay uu dhigayo marka loo eego xabsi ka dhimista.

c) Waxa uu xaq u lahaanayaa xabsi ka dhimis mudada xabsiga uga dhiman si la mid ah maxbuus lagu xukumay xadhig xukun ka soo baxay maxkamad Somaliland ah oo u dhiganta muddada xadhigaas.

2. Xabsi ka dhimis xadhig si waafaqsan Xeerkan ee Qodobkan xubintiisa (1) xarafka (b) waxa uu mutaysan karaa in la mariyo talaabo anshax oo ka dhalatay faldambiyeed uu galay si la mid ah maxbuus xabsi ka dhimis ku jira oo ay xukuntay maxkamadaha Somaliland.

## Qodobka 14aad

## (Xabsiga lagu Haynayo Maxbuuska)

1. Sida lagu soo sheegey Xeerkan, maxbuus la soo wareejiyay waxaa lagu xidhayaa xabsiga ama meesha uu tilmaamo Wasiirku si uu ugu qaato inta uga hadhay xadhiga xukunkiisa.

2. Maxbuus la soo wareejiyay, marka loo eego maxbuuskaa lagu xukumo Somaliland haddii ay da'diisu yar tahay oo ay keenayso in lala tiigsado Xeerka da'yarta ku xadgudbta sharciga, waxa markaas lagu dhaqayaa xeerka da'yarta ee Somaliland (Juvenile Justices' Law).

### Qodobka 15aad

### (Kormeerid iyo Hubin Maxbuuska la soo Wareejiyey)

1. Kormeerayaasha wadaniga ah ama kuwa goboleed amase kuwa caalamiga ah waxaa loo ogolaanayaa inay si buuxda u kormeeraan oo ay hubiyaan maxaabiista la soo wareejiyey si waafaqsan heshiisyadda calaamiga ah ee wareejinta maxaabiista oo ka mid tahay xaq u lahaanshaha inay waraystaan maxabiista la soo wareejiyey iyadoo ayna la joogin hay'adaha dawladda ee dalku.

2. Wasiirku waxa uu xeer-nidaamiye ku soo saarayaa habka ay kormeeyaasha wadaniga ah, gobolka ama kuwa caalamiga ahi u samaynayaan kormeerkaas isagoo gacansaar kala yeelanaya Wasiirka arrimaha dibadda; Wasiirka arrimaha gudaha iyo xeer ilaaliyaha guud.

### Qodobka 16aad

### (Saamaxaad uu fidiyo Madaxweynuhu "Pardon")

1. Xeerkan laguma fasiri karo si ka duwan awoodaha madaxweynuhu ku leeyahay saamaxaada Maxbuuska marka loo eego Dustuurka Somaliland.

2. Awoodda saamaxaada marka loo fidiyo maxbuus la soo wareejineyo oo ku sugan waddankaas la tilmaamay, waxa loo raacayaa si la mid ah awood isticmaalka uu madaxweynuhu ku leeyahay marka loo eego dastuurka Somaliland.

## QEYBTA SADDEXAAD

### –Ka Wareejinta Maxaabiista Somaliland–

### Qodobka 17aad

### (Wargelinta Maxbuuska la Wareejinayo)

1. Marka ay heshiis wada galaan Somaliland iyo dal tilmaaman heshiis maxaabiis is waydaarsi ah , markaas Taliyaha Ciidanka Asluubtu waa in uu wargeliyaa maxbuuska dalkaas u dhashay ujeedooyinka heshiiska.

2. Maxbuusku wuxuu codsi qoraal ah ugu soo gudbin karaa Wasiirka, si loogu wareejiyo dalkaas tilmaaman, isagoo u soo marinaaya Taliyaha Ciidanka Asluubta;

3. Iyadoon wax loo dhimayn xubintan 2aad ee Qodobkan wasiirku wuxuu markaas dalban karaa wareejinta maxbuuskaas iyadoon wax dalab ahi aanu la socon ama oggolaanshaha maxbuuska xukuman, marka ay sidaasi waafaqsantahay heshiis la isla qaatay.

4. Wasiirku haddii uu aqbalo codsigaa wareejinta, waa in uu dalab u diraa hay'ada qaabilsan wareejinta ee dalkaas la tilmaamay iyadoo ay la jiraan:

   (a) Codsigii uu sameeyay maxbuusku ama nuqul sugan oo codsigaas ah ama

   (b) codsiga wasiirku ku dalbanayo in la wareejiyo maxbuuskaas si waafaqsan xubinta sadexaad iyo

   (c) Shuruudaha gaarka ah ee lagu tilmaamay Qodobka 4aad ee Xeerkan.

### Qodobka 18aad

### (Wareejinta Maxbuuska)

1. Haddii dalkaasi tilmaamani uu oggolaado wareejinta maxbuuska, Wasiirku waa in uu markaas u diraa hay'ada qaabilsan ee dalkaas dalab soo saaris amar oggolaanaya in laga soo qaado maxbuuska xabsigii lagu hayay oo lagaga soo saarayo Somaliland laguna wareejinayo hay'ada masuulka ka ah xabsiga loo wareejinayo ee dalkaas tilmaaman;

2. Iyadoo wax loo dhimayn qodobada Xeerkan, marka dalka tilmaaman uu aqbalo in loo soo wareejiyo maxaabiis u dhashay dalkaa, si ay xukunka inta u hadhsan ugu qaataan dalkaa, markaas Wasiirku isagoo raacaya shuruudaha uu heshiiskaasi xambaarsan yahay wuxuu qaadayaa talaabooyinka waafaqsan Qodobka afraad ee la xidhiidha wareejinta maxbuuska ee dalkaas

## QEYBTA AFRAAD

### – Xabsiga iyo Wareejinta Maxbuuska Xukuman-

### Qodobka 19aad

### (Xaaladda Maxbuuska marka la Wareejinayo)

1. Maxbuuska loo soo wareejinayo ama laga wareejinayo Somaliland waxaa loo aqoonsanayaa in uu yahay qof ku sugan xabsi, qofka la socdana waxaa loo aqoonsanayaa sarkaal u xilsaaran ilaalinta maxbuuska;

2. Haddii maxbuuska ku tilmaaman faqradan hore uu ka baxsado hayntaa sharciga ah, waxaa loo aqoonsanayaa si la mid maxbuus ka baxsaday xabsi loogu hayay amar ka soo baxay hay'adaha awooda u leh ee Somaliland.

### Qodobka 20aad

### (Iswaafiqid La'aanta Xukunka iyo Sharciga dalka)

1. Iyadoon wax loo dhimayn qodobada Xeerkan, marka xukunka maxbuuska loo soo wareejiyay Somaliland uu ka soo baxay dal tilmaaman ee nooca ama muddada

xabsigu aanay waafaqsanayn shuruucda Somaliland, markaas iyadoo la dhawrayo heshiiska maxaabiis iswaydaarsiga ee la galay ka hore wareejinta maxbuuska, waxa ay Somaliland markaas waafajinaysaa xukunka si la mid ah fal-dambiyeedkaas marka loo eego shuruucda Somaliland. Sidoo kale Somaliland waxay xaq u leedahay inay hesho xaqiiqada dhabta ah ee fal-dambiyeedkaas, xukunka iyo go'aanka maxkameed iyo xadhiga saran maxbuuska. Sidoo kale xadhiga la saaray maxbuusku waa inuu waafaqaa xukunka. Xukunka xadhiga ah waa inaanu noqon mid siyaadiya marka loo eego noociisa iyo mudadaba. Si kasataba ha ahaatee ciqaabaadka saran maxbuuskaas waa inaanay dhaafin xuduuda ciqaabta u dajisan Somaliland si waafaqsan dambigaas. sidoo kale garsoorka Somaliland uma bedeli karaan xukun xadhig mid ganaax ah.

2. Madaxwaynuhu wuxuu fidin karaa cafiska ku tilmaaman Qod:90aad, faqradiisa 5aad ee Dastuurka JSL; intii suuragal ah ee uu ka waafaqsanaanayo xukunkaas shisheeye.

## Qodobka 21aad

## (Dhamaanshaha Xukunka)

1. Marka maxbuus la soo wareejiyey oo xukun ku qaadanaya Somaliland uu wasiirku ogaado in dalkii maxbuuska laga soo wareejiyay uu adeegsaday cafis ama xabsi ka dhimis oo xukunka ka dhigaysa mid aan sii fuli karin, talaabadaas oo la qaaday waxyar ka hor markii maxbuuska lagu soo wareejinaayey Somaliland ama xadhigiiba dhamaaday markaas kadib markuu la tashado xeer-ilaaliyaha guud wuxuu amrayaa in aan maxbuuskan xukunkaas awgiis xabsiga loogu sii hayn Karin.

2. Marka maxbuus laga wareejiyey Somaliland uu xukun ku qaadanayo dal tilmaam, si waafaqsan Xeerkan, haddana intii lagu jiray wareejinta la adeegsaday cafis ama xukun ka dhimis oo ka dhigaysa xukunkaa mid aan laga sii fulin karin Somaliland ama xukunkiiba noqday mid dhamaaday, Wasiirku wuxuu dalkaas tilmaaman ee loo wareejiyay maxbuuska shisheeye ku wargelinayaa in aan maxbuuska xukunkaas awgiis xabsiga loogu sii hayn Karin.

## Qodobka 22aad

## (Kharashka Wareejinta Maxbuuska)

1. Marka Maxbuus la wareejinayo kharashka wareejinta maxbuuska si waafaqsan Xeerkan wuxuu saaran yahay Somaliland iyo dalkaas la tilmaamay hadba sida lagu heshiiyey.

2. Marka maxbuus udhashay Somaliland loo soo wareejinayo kharashka wareejintu wuxuu saaran yahay qofka maxbuuska ah ama wakiilkiis, waxaana Wasiirku dalban karaa damaanad si loo sugo in kharashkaas dib loogu celiyo xukuumadda.

3. Marka Maxbuus aan ahayn muwaadin Somaliland loo soo wareejinayo kharashka wareejintu waxa uu saran yahay dalka laga soo wareejiyay,sidoo kale kharashka haynta maxbuusku wuxuu saran yahay dalkii laga soo wareejiyay

4. Kharash kasta oo ku xusan farqadda 2aad waxaa loo tixgelinayaa dayn madani ah oo ay leedahay Xukuumaddu.

5. Farqadda 2aad iyo 3aad lama dabakhaayo marka Wasiirka ay u muuqato inaanay cadaalad ahayn oo aanay xaq ahayn inuu adeegsado awoodahaas lagu tilmaamay farqadahaas, sababtoo ah:

   a) Duruufo gaar ah oo jira awgood;

   b) Dhaqaalaha maxbuuska oo aan dabooli karin kharashka looga baahan yahay sidoo kale soo celinta deyntaas oo aan suurtogal ahayn marka loo eego Maxbuuska ama cid kale oo isaga ka wakiil ah.

   c) Iyadoo dawladdaas tilaaman ay isla waafaqeen dal saddexaad inuu u soo wareejiyo ama ka wareejiyo maxbuuska dalkaas iyadoo la fulinaayo qorshe la isla meel dhigay oo la xidhiidha wareejinta maxaabiistaas.

6. Marka maxbuus laga wareejinaayo S/land wuxuu si la mid ah kharashka wareejinta saaran yahay dalkaas tilmaaman.

## Qodobka 23aad

## (Sii Hakashada Maxbuuska)

1. Waddanka u baahda fasax si ay uga soo degaan oo ay ugu sii hakadaan Somaliland Maxbuus iyo Ilaalada la socota, waxay weydiisanayaa Wasiirka ogolaansho dal ku soo deg iyo ku-hakasho Somaliland.

2. Wasiirku wuu diidi karaa inuu soo saaro ogolaanshaha ku-hakashada marka:

   a) Qofka wareejinta loo doonayaa uu yahay mid u dhashay Soomaliland; isla markaana.

   b) Dembiga lagu xukumay uu yahay mid aan dembi ka ahayn marka loo eego Shuruucda dalka Somaliland; ama

   c) Qofka la wareejinayaa uu yahay mid la baadigoobaayey iyadoo loo haysto dembi ka dhan ah shuruucda Somaliland.

3. Oggolaanshaha lagu soo saaray si waafaqsan xubinta (1) ee Qodobkan wuxuu u banaynayaa in maxbuuska lagu hayo xabsi waqti ku-meel-gaadh ah oo suurtogal ah si loogu fududeeyo dawladda dalbanaysa wareejinta iyo midda loo wareejinaayo.

4. Maxbuus la aqbalay in lagu sii hayo ku-meelgaadh si waafaqsan xubinta (1) ee Qodobkan , muddada uu joogo Somaliland looma xidhi karo isla markaana looma hayn karo inta uu ku sugan yahay Somaliland iyadoo loo haysto dembi uu galay ama xukun a[y] saartay Somaliland ka hor wareejintiisa.

## Qodobka 24aad

### (Xeer-Nidaamiye)

1. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro xeer-nidaamiye fududeeya oo lagu dhaqan-gelinaayo Xeerkan.

2. Xeer-nidaamiyaha laga soo saaro Xeerkan, waxaa lagu tilmaami karaa:

   (a) qaabka ama habka uu maxbuusku u dalbanaayo codsiga soo wareejinta ama ka wareejinta Soomaliland;

   (b) Arrin kasta oo lagu tilmaamay Xeerkan ama arrin kasta oo ay tahay in lagu sheego xeer-nidaamiyaha.

3. Xeer-nidaamiyaal kala duwan waxaa loo samayn kara waddamo tilmaaman oo kala gedisan.

## Qodobka 25aad

### Dhaqan Galka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Xeer-dejintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xog .Guud ee Golaha Wakiilada**

..........................

**C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

..........................